

Sida loo isticmaalo app-ka dabagalka xiriirka smitte|stop

Sida loo soo dejisto oo loo bilaabo isticmaalka app-ka

1. Ka soo dejiso app-ka smitte|stop App Store ama Google Play Store. App ka waxaa lagu heli karaa nooc Ingiriis iyo dheenish ah.
2. Marka ugu horeysa ee aad furtid app-ka, waa inaad aqbashaa macluumaadkaas ku saabsan isticmaaleyaasha kale app-ka ee aad xiriirka dhow la lahayd lagu keydiyo taleefankaaga. Foomka oggolaanshaha waxaa lagu heli karaa Ingiriis iyo Dheenish.
3. Sidoo kale waa inaad aqbashaa in app-ku adeegsanayo tiknoolajiyada Google iyo Apple ee 'Bandhigista Faafitaanka COVID-19'.
4. Taleefankaagu hadda wuu diiwaangelin doonaa isticmaalayaasha kale ee app-ka ee aad xiriirka dhow la lahayd, adigoo awoodin inaad aragto cidda ay yihiin. App-ku wuxuu ka shaqeeyaa dhanka danbe, markaa uma baahnid inay shaashadu kuu daarnaato.

Sida loo ogeysiyo kuwa kale haddii lagaa helo coronavirus

1. Taabo 'Positive test result?' (Hadii lagaa helay?) Shaashadda weyn ee app-ka, ka dibna waxaa lagu weydiin doonaa inaad gasho adoo isticmaalaya NemID.
2. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad isku aragtay calaamadaha COVID-19 iyo goorta ay bilaabmeen.
3. Kadib waxaa lagu weydiin doonaa inaad booqatay wadamo kale 14-kii maalmood ee la soo dhaafay.
4. Ugu dambeyntii, waxaa lagu weydiin doonaa hadii aad rabto inaad la wadaagto furayaasha aqoonsiga ee taleefankaagu soo diray 14-kii maalmood ee la soo dhaafay. Hadii aad ku jawaabto haa, dadka aad si dhow ula xiriireysay waxaa fariin loogu dirayaa app-ka in ay xiriir dhow la yeeshen qof qaba COVID-19 iyo in laga yaabo inuu cudurka ku dhacay.



Hel ogeysiin haddii aad xiriir dhow la lahayd qof laga helay coronavirus

1. App-ka ayaa kuu soo diri doona ogeysiin haddii aad xiriir dhow la yeelatay isticmaale app-ka oo laga helay coronavirus isla markaana la wadaagay isticmaalayaasha kale ee app-ka.
2. Xiriirka dhow waxaa loola jeedaa inaad sida ay u badantahay ka agdhowdahay qof cudurka qaba, mudada la filayo inuu isagu ama iyadu faafin karo, in kabadan ku dhowaad 15 daqiiqo iyo inaad u jirtay wax ka yar qiyaastii 1 miitir qeyb ah.
3. Maaddaama lagaa yaabo inaad qaaday cudurka, waxaa lagu farayaa inaad raacdo talooyinka ay bixiyaan mas'uuliyiinta bulshadu, oo ay ku jiraan in lagaa baaro.
4. Talooyinka ayaa ah inaad iskarantiisho oo aad fiirto gaar ah u yeelato nadaafadda iyo nadiifinta iyo haddii aad yeelato calaamadaha COVID-19.

